# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 09:48 AM** **Hansard No.19/4** **24,25,29/09/2012**

**Dooda Xeerka Aasaaska Komishanka M/W iyo L/M, waxay socotay 3 Cisho waxaa ka qayb qaatey 19 mudane.**

**Gudoomiyaha: -** Md. Baashe Maxamed Faarax ayaa fadhigan Gudoominaya ka dib Furitaankii Quraanka wuxuu mudanayaasha ku wargaliyay inay Maanta Bilaabmeyso Doodii Xeerka Aasaaska Komishanka Maamul wanaaga iyo La-dagaalanka Musuqmaasuqa sidaa darteed dooda la bilaabayo

***Doodii Mudanayaasha:-***

1. **Md. Faarax Maxamuud Cabdule:-** marka hore waad salaaman tihiin, Xeerkan markan eego Qodobka 1aad halkaa waxaan ka saaray anigu magaca Aasaaska oo waxaan ku soo gaabiyay inuu noqdo Xeer maamul wanaaga iyo la dagaalanka Musuqa,

**Qodobka4^aad^ F/5^aad^** waxaa ku jira 7 ama 5 sano markaa labadaasi meesha ma wadagali karaan, marka anigu waxaan qaatey 5 sano inaany ka yaraan **F/3^aad^** Meesha in laga saaro ayaan soo jeedinayaa waayo farqada 1aad ayaa ku filan oo ay Immunity ka hadleysa markaa madaama ay isku wax ka hadlayaan waan ka saarayaa. Isla F/5aad iyana waa in meesha laga saraa baan u arkaa oo la mid tan hore, Qodobka **5^aad^ F/17^aad^** waxaan soo jeedinayaa in Farqadan loo " ***Komishanku waxa awood u leeyaha inay soo jeediyaal sharciyo lagu diiwaan galinayo hantida saraakiisha dawlada***" Waxaana Qodobkan ku daray Farqada 21aad oo odhanaysa ***(Komishanka wuxuu awood u leeyahay inuu soo jeediyo talooyin u sinaanta umada shaqada dawlada)*** oo ay awoodihiisa ka mdi noqoto

**Qodobka 6^aad^ F/2^aad^** halka komishanku wuxuu ka koobnaanayaa 5 xubnood waxaan ka dhigay "***Komishanku wuxuu ka koobanaandoonaa 7 xubnood***" **F/3^aad^** halka Magacaabidoodana waxaan ka dhigay "7 xubnood ee komishanka waxaa magacaabaya Madaxweynaha waxaa cod haldheeri ah ku ansixinaya Golaha Wakiilada, waxaana xilka ka qaadaya Madaxweynaha iyadoo Golaha wakiiladuna ansixiyo xilka qaadistooda . Waxaana ku daray **F/7^aad^** oo ah (Komishanku waxay iska dhex dooranayaan Gudoomiye iyo Gud. Ku-xigeen).Isla **Qodobkaa F/6^aad^** halka ah Hadba inta Awoodu u saamaxdo waxaan ka dhigay***" Hadba inta ay u baahdaan".***

**Qodobka 7^aad^** waxaan ka dhigay "***Wuxuuna kormeeri karaa Gobol ama Degmo kasta oo uu u baahdo***" **Qodobka 10^aad^** waxaan ku sii daray "***Madaxweynuhuna ka ogolaaday"*** **Qodobka 8^aad^ F/3^aad^** eror ku jiro waxaa ku qoran Xeerasha, taana ha la saxo oo ha ala gadhio Qodobka 17aad F/2aad farqadu ma dhameystina waxaa ka maqa

kalmad ah Masuul kasta oo dawlada xil u haya, Farqad cusub oo **12aad** "***Komishanku ma sheegi cida xogta siisay".***

**Qodobka 18aad F/4aad iyo F/5aad** "***waa inuu komishanku u Gudbiyaa Madaxweynaha Hadii Maamul xumo tahay, Hadii ay tahay Musuqmaasuqna waa inuu u gudbiyaa Hantidhowraha"*** in laga dhigo ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 24aad** inaga xeerarkeenu wuxuu dhaqan galaa iyadoo aan faafin rasmiya lagu soo saarin, markaa waa in intaa danbe laga saaraa Qodobkan.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Qodobadaa iyo Qodobadii Maamulka ee xeerka maqan marka lagu soo daro,

2. **Md. C/raxman Cisman Caalin:-** Gudiddu aad bay u soo dadaaleen, laakiin qabto badan baa ka maqan, marka kowaad waxaa xeerka ka maqan Mabaadiidii loo aasaasay waa in laga daraa oo Qodobka 2aad laga dhigaa, halka ay ku qeexantahay Musuqmaasuq ee Erey bixinta laga dhigay ayaa si toosa uga hadlaysa Mabaadiida Xeerka loo aasaasay markaa waa in inta laga saaro erey bixinta, **Qodobka 2aad** laga dhigaa oo uu noqdaa qodobka Mabaadiida xeerka ka hadlaysa.

   Waxaa fasiraad dhaba u baahan Musuqmaasuq oo tan halkan ku taal maha fasiraadii ereyga Musuqmaasuq markaa iyana waa in loo sameeyaa, **Qodobka 3aad F/3aad** ee shuruudaha Xubnaha Komishanka halka da'da waxaan soo jeedinayaa ***in laga dhigo 25 sano***, halkuu iminka ka yahay 30 sano. Xubnaha komishanka inay 5taa xubnood ahaadaan ayaan taagersanahay oo lagu daayo,**F/7aad** ee **Qodobkan 3aad** ***waa in gabi ahaanba laga saaraa*** waayo waxay sheegaysaa waxyaabo aynaan cadeyn Karin, oo waxaa ku fulan qodobka F/1aad, **F/8aad** ee isla qodobkan ***waa in laga saaraa halka Jidh ahaan***, oo haduu maskax ayaan faya qabo hawshii wuu gudan karaa, kumana xidhna Jidh ahaan.

   **Qodobka 4aad F/1aad iyo F/3aad** waa isku mid oo isku waxbay ka hadlayaan, markaa waa in mid ahaan loo daayaa oo tan kale laga saaraa.**F/4aad** waa in laga saraa halka Madaniga ah, xildhibaanada labada gole kama xaaraan sana in lagu qaado dacwad madaniyga ah ee tan ciqaabta, oo dacwada madaniga ahi way ka baxsantahay Xasaanada, **F/5aad** faarax baan la qabaa oo iyana in laga saaro ayaan qabaa, Xeerka Hantidhowrka waa in lala akhriyaa xeerkan si aanu awooda hantidhowraha Guud ee uu sheegayo xeerkan Komishanku uga hor iman.

   Wixii xisaabaad ah halaga saaro waayo hantidhowrahaa iska leh awooda wixii xisaabe, oo maamul wanaaga uun halug daayo, **Qodobka 5aad F/11aad**, Komishanku waa komishan talo-bixineed Madaxweynaha ayuu siinayaa warbixin oo inoo soo gubin kara, laakiin Golaha, **F/18aad** maan fahmin iyana yaynaan isku sii deyn. **Qodobka 6aad F/4aad**

Agaamiha Komishanka waxaan soo jeedinyaa inay Gudidu soo magacawdo. **Qodobka 17aad** ee Awoodaha Komishanka, waa Awoodihii Hantidhowraha Guud oo la soo naqliyay, markaa waa in sideeda meesha looga saaraa,

**Qodobka 18aad F/3aad** hadii qodobkaas aad eegto wuxuu ka sheekeenayaa shaqadii Hantidhowraha waxaana la mida **Qodobada 20, 21 iyo 22aad** oo dhamaantood ka hadlaya shaqadii Hantidhowraha Guud,

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- In Xeerka Magaciisa lagu soo koobo Xeerka Maamul Wanaaga laga dhigo, lagana saarao shaqada hantidhowraha Guud ee la dagaalanka Musuqmaasuqa oo dhan la xidhiidha.

3. **Md. Maxamud Axmed Obsiiye:-** Marka hore Gudida soo diyaarisay Xeerkan waan u mahadnaqayaa, waxaana fiican in hay'adaha kale ee wali xeerarkoodii keenin ay si degdega u keenaan, Waxaan marka ugu horeysa soo jeedinayaa in xeerkan si degdega loo anisixiyo , Qodobka 3aad halka Mudada Xilka waa in 5 sano loo daayaa oo la yidhaahdo Mudaha xilka , Gudidda Madaxbanaan laga dhigaa, Tirada Xubnaha in 7 xubnood laga dhigo mudanayaasha soo jeediyay ayaan ku taageersanahay, Magacaabista Gudidda inuu madaxweynuhu Magacaabo Golaha wakiiladuna ansixiyo iyana waan qabaa,

   Kuma raacsani mudanayaasha leh waa Inay shaqada hay'adani noqotaa Maamul wanaaga, waxaana ku adkeysanayaa Qodobka 18aad F/4aad inay sideeda noqoto ayaan soo jeedinayaa.

   **Waxaan soo jeedinayaa:-**

   - In xeerkan oo si degdega loo ansixiyo ayna muhiim tahay Gudiddani, waad mahadsantihiin.

4. **Md. Maxamed X. Yuusuf Waabeeye:-** Xeerkan wuxuu xambaarsanyahay laba qodob oo kala ah Maamul wanaag iyo La-dagaalan Musuqmaasuq, markaa anigu marka horeba waxaan soo jeedinayaa in Xeerkan loo daayo oo kaliya Maamul Wanaaga oo laga reebo La-dagaalanka Musuqmaasuqa, Magaciisana laga dhigo Xeerka Aasaaska Komishanka Maamulwanaaga, **Qodobka 4aad F/5aad** halaga saaro waayo maaha Golaha Wasiirada oo kale Xasaanada intaa le'egna ma helikaraan.

   **Waxaan soo jeedinayaa:-**

   - In Xeerkan loo daayo Maamul wanaaga oo kaliye oo marka aynu saxno ansixino. Waad mahadsantihiin.

## Maalintii 2aad ee Dooda Xeerka Maamul wanaaga iyo ka hortaga Musuqa

5. **Md. Maxamed Xuseen X. Ciise:-** waxaan halkan ku hayaa warbixin 2002-2011kii aduunyadu siday u kala horeyso Maamul wanaaga, hay'ada warbixintan soo saarta oo ah hay'ad caalamiya markaan reportka qoreyno somaliya oo Somaliland ku jirto waa wadanka ugu hoseeya Maamul wanaaga iyo musuqmaamsuq, number bay siiyaan o Matalan 0 ugu horeyso 10na ugu sareyso, Somaliland afrikay kala mid taha 10sano ee 1aad oo ma dhaqaajin waxaana ugu horeeya Newzealand, mareykan iyo ingriisa 7 ma dhaafo, waxyaabaha ugu mihiimsan ee ka la eegayaa waxaa weeye sida shuruuc iyo hay'do la dagaalama musuqa ay uga jiraan dalkaaaga.

Xeerka magaak guda galo, Qodobka 2$^{aad}$ halka ugu danbeysa ee lagu qeexay kalmada Maamul wanaag waa in lagu daraa Qodobka 6$^{aad}$,

**Qodobka 5aad/F17$^{aad}$** waxaan soo jeedinayaa in lagu daro Qodobk a17aad ee awooda komishanka waayo taas oo kale Waajibaad maaha ee Awoodihii komishanku lahaa, sidoo kale **F/20$^{aad}$** halagu daro awooda komishanka ee **Qodobka 17$^{aad}$,**

**Qodobka 6$^{aad}$** magaca Qodobka halaga badalo ayaan soo jeedinayaa oo ha laga dhigo Qaab dhismeedka F/1aad wxaan soo jeedinayaa in 7 xubnood laga dhiga tirade Komishanka, **F/4$^{aad}$** anigu Agaasimaha waxaan soo jeedinayaa inuu ku yimaado qaabka shaqaalaha dawladu ku yimaado, oo uu noqodo agaasime maamul oo Gudidu iyadu keensato, laakiin aanu madaxweynuhu soo xulin sida gudidda, Farqada cusub baan ku darayaa oo ah, **F/7$^{aad}$** Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku-xigeenka waa inay Gudiddu iska doorataa.

**Qodobka 10$^{aad}$ F/4$^{aad}$** waa in lagu daraa Go'aamada gudidu waxay kua ansaxayaan Cod haldheeri a,. **Qodobka 12$^{aad}$** waa in la yidhaahdaa "waa inuu Madaxweynaha iyo Golaha Wakiilada u soo gubiyaa Xiliga ugu haboon labadaba" **Qodobka 17$^{aad}$ F/2$^{aad}$** halkaa waxaa ka maqan kalmadan ah Masuuliyiinta Qaranka iyana ha laraaciyaan ayaan odhan lahaa.

### Waxaan soo jeedinayaa:-

- Xeerkani waa muhiima waa inaynu sida ugu haboon u dhignaa dabadeedna ansixinaa.

6. **Md. Cali Xasan Maxamed:-** Xeerkan loo bixiyay komishanka maamulwanaaga iyo la dagaalanka musuqmaasuqa, horta hay'adani waa hay'ad jirta oo mudo 2 sano way shaqaynaysay, lkn iminkuun baa la inoo keenay, Xeerkani markaan akhriyay, markaa awoodaha la siiyay waxay ka hor imanayaa dastuurka, komishankan oo aan ahayn

hay'ad dastuuriya oo lagu aasaasay Xeer Madaxweyne, waxaad moodaa inay ka horimanayaan hay'ado dastuuriya awoodohoodii, mana fiicna in hay'ad aan dastuuri ahayn awood hay'ad dastuuriya inay ka awood badato, waxayna ka horimanaysaa Qodobo Dastuuriya sida **Qodobka 37aad** ee kala Xadeynta Awoodaha hay'adaha dawlada, markaa waxaan tilmaan kooban ka bixinayaa sida uu dastuurka uga hor imanayo.

**Qodobka 17aad F/1aad iyo 2aad** waxay sheegayaan shaqadii Golahayaasha barlamaanka Farqdada 3aad markaan gaadho na waa shaqadii iyo awoodihii Hantidhowraha Guud, Farqda 10aad markaad eegtona wuxuu galay awoodii garsoorka oo isku qaadaya, waxaynu naqaanaa in marka maxkamada kuu yeedho ay warqad kuu soo qorto hadaad iman weydona lagu xidho, markaa gudiddu waxay tidhi hadii komishanku marka uu kuu yeedho waa inaad timadaa hadaad diidona waa lagu xidhayaa markaa awoodii maxkamada.

Hantidhowraha waxay ka dhigteen inay markay u baahdaan ay kaashadaan, hantidhowrahaana awoodbadan, markay ku qanciwaayana waxay yidhaahdeen Madaxweynaha ayay u gudbinayaan iyo Golaha Wakiilada. Markaa Waxaas oo dhami waxay ka soo horjeedaan **Qodobkii 17aad** ee tilmaamay dastuurka, wuxuu kaloo ka soo horjeedaa Xeerkii Ciqaabta Guud, sidoo kale waxay soo horjeedaa Xeerkii Nidaamka Garsoorka.

Markaa **Qodobada 17aad, 18aad , 4aad iyo 23aad** dhamaan waxay si caadiya ugu horimanayaan dastuurka, oo waa qayru dastuuri, markaa hadaynu nahay Golaha Wakiilada uma qalmo inaynu ansixino.

**Sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa:-**

- Inaynu sidiisa ku ansixino Xeerkii Xukuumadu inoo soo Gudbisay oo ka kooban 18 Qodob oo isagu ah mid cad oo dastuurka ka horimnayan.

7. **Md. Axmed Maxamed Kijandhe:-** Runtii Xeerkan muhuumada weyn buu dalka u leeyahay sababtoo ah iyadoo ay dalka ka jirto Musuqmaasuq fara badan, hadaan xeerkan eegay horta Ma madaxbanaana oo (independence) malaha komishanku, sidoo kale siduu maxkamada ugu gudbinayo oo danbiyada u soo oogayo ma madaxbanaana, markaa dhawr arrimood baa fiican in laga eego oo ka mid tahay, siduu u madaxbanaan yahay komishanku oo faragalin iyo dhaqdhaqaajin uga madaxbaanayahay, hadaanu madax banaaneyna wuxuu noqonayaa Gudi kharash uun soo kordhisa oo iska fadhiid ah.

Tan labaad, waxa weeye in laga eego cidey u (report)gareynayso oo wax u soo gudbinayso iyo ciday dacwada u soo gudbinayso, taana malaha, makraa waxaan leeyaha

waa inay cida ay dacwada iyo (report)ka u soo gudbinaysaa noqotaa Gudida (anticorruption) barlamaanka waa ina halkaa lagu cadeeyaa, tan kale sidii mudanayaal iga horeeyay sheegeen, Xeerkani wuxuu (redadunce) ku yahay awoodo iyo xeerar kale iyo shaqooyin ay hay'do kale leeyihiin sida hantidhowrka, markaa xeerka aynu sameynayno waa inaynu kala saarnaa Gudidda sida ay u shaqeynayo iyo awoodaha hay'adaha kale leeyihiin.

runtii waxaa jira dawlada farabdaan oo sameeyay Gudida musuqmaasuq, hadana waxba kamey qaban, markaa waa inuu xeerkani noqdaa mid wax ka qaban kara Musuqmaasuqa jira, oo (instrument)igii uu wax kaga qaban lahaa loo sameeyo oo xeerkan sidii mudanayashi iga horeeyay sheegeen in xeerkan aad awooda loo saaro oo masuuliyada farabadan la iska saaro, oo aanu noqon mid qaar awood leh awood sii siinaya, masaakiintana awood dul dhigaya.

Markaan u soo laabto Qodobada Xeerka, waxaad moodaa xeerku inaanu dhameyn sida awoodaha la isku xidhiidhiyo, Qodobka 5aad halka shaqada iyo waajibaadka uu leeyahay ku taal, meel kalena waxaa ku taal awoodaha u leeyahay, markaa hadii la isku xidhiidhiyo awoodaha iyo shaqada uu leeyahay ilaa madaxtooyada ayuu gaadhaya, markaa waxani waxay u baahan yihiin in la yareeyo oo wax muhiima laga dhigo, oo aanu taaban awoodihii xeer dejinta iyo hay'adaha kale.

**Qodobka 5aad F/aad** ma dhama oo waxay u baahan tahay in la cadeeyo, oo wuxuu leeyhay ilaa qorshayaasha dawlada ayuu daba galayaa, waana in meelahaas dib loogu noqdo, si aanay cid walba u eryan, **Qodoba 18aad** halka diiwaangalinta ku xusan Agaasimaha waaxeedyada ilaa madaxweynaha, iyana ma cada, Komishanku waa inuu yeeshaa 3 waaxood oo kala ah Baadhis, Ka horta iyo Wacyigalin iyo xidhiidhka dadweynaha, xeerkii musuqmaasuqa oo aynu sameynay muu shaqayn oo meynaan daba galin, markaa hadii ina dhabtay inaynu musuqmaasuqa baabi'ino waxaas oo dhan waxay u baahan tahay in la sameeyo sida hantida dawlada loo maamulo iyo sida cashuuraha loo qabto, waxaas oo dhan waxay u baahan yihiin in wax laga qabto, hadii kale hay'ad fadhiida inaynu soo kordhinay bay noqoneysaa.

**Sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa:-**

- Inaynu saarno Xeer wax ka qaban kara Musuqmaasuqa iyo sidii wax looga qaban lahaa loona baabi'in lahaa, oo aynaan soo kordhin hay'ad fadhiida. Waad mahadsantihiin.

8. **Md. C/laahi Xuseen Cige:-** Runtii xeerkan markaa akhriyay komishankani waa mid muhiima, laakiin waxaad moodaa xeerkan inay ku jiraan wax iska hor imanaya, oo wuxuu leeyahay qofkastoo oo diida farqada sare ku xusan wuxuu galayaa danbi qaran, markaa haday madaxweynaha u yeedhaan oo uu diido miyay xidhayaan, waa awoodaha

badan ee iska hor imanaya, waxaa kaloo ka mida, **Qodobka 3aad** shuruudaha Komishanka, Halka 30 sano inaanu ka yaraan, waa inaan ku darnaa 65 sano ka weynaan si labada dhinacaba loo xadeeyo oo aan qof xilka aan gudan Karin loo keenin, , Halka Jaamacad ama wax u dhigma waa inaan ka dhignaa Heer jaamacadeed Master ama wax ka sareeya, Tan maamuuska ee ah inay la mid noqdaan sida Wasiirada, taan in laga saaro ayaan soo jeedinayaa.

Madaama uu hore u jirey Xeer Musuq maasuq waxaan odhan lahaa awooda halaga dhigo, oo halagu soo koobo inuu yahay mid hirgalinaya awoodaha Xeerka ku tagrifalka Hantidada Qaranka iyo la dagaalanka Musuqmaasuqa ku xusan oo Gudidu ha ku shaqayso awood xeerkaasi dhigayo, waxaan kaloo soo jeedinayaa si Gudiddu (accountable) u noqoto ina lagu daro, Gudidu waxay (accountable) u yahay baarlamaanka, si ayna (excutive)ka oo kaliya ugu koobnaa, taas ayaan soo jeedinayaa

9. **Md:- Siciid Maxamed Cilmi:-** marka hore waxaan u mahadnaqayaa Gudidda xeerka soo gudbisay oo xawlbadan soo qabatey, anigu waxaan ka hadlayaa 3 qodob, ugu horeyna waxaynu ognahay inaynu leenahay Hantidhowr arragtida ka danbeysana tahay inuu la dagaalamo musuqmaasuqa, markaa Gudiddan waxaa loo sameeyayna maaha inay isku soo dhacaan iyaga iyo xaafiiska hantidhowrka, markaa waxaan soo jeedinayaa :-

- Gudiddu waa inay ka madaxbaanato amarada iyo go'aamada dawlada
- Magacaabista waxaa fiican inaan lagu sii deyn madaxweynaha oo kaliya oo aynu, si ay gudidu u noqoto mid dhexdhexaada oo Gudidda kala badh ay soo xulaan Golaha wakiiladu, si hay'ad umada u dhaxeysa loo soo xulo.
- Xilka qaadista hadii u aragto meeshaa uu faragashay mid ka soo horjeeda oo ay eryi karto, markaa waxaan ka dhigay in Golaha Wakiiladu ansixiyo eryidooda sidii markii loo magacaabay u ansixiyaan.
- Meelaha Musuqmaasuqa ka jiraan in la sameeyo nidaam ay dadweynuhuna ugu keeni karaan war, oo yidhaahdaan in halkaa musuqmaasuq ka jiro, lagu ilaalin karo qofka soo sheegay aan amaankiisu halis ku gali Karin.
- Warbixinta sanadka ah, waxaa fiican inay sanadkii ka yaraato oo laga dhigo warbixinta ay bixinayaan ay noqoto mid marwalba la keeni karo si toosa oo cidwalbana ku socota.
- Qodobka 21aad ee Oogida Faldanbiyeedyada, halkaa hadaynu arrintii gacanta u galino oo dib ugu celino hantidhowrihii guud oo xukuumadii ka mid, oo ay kala aragti noqdaan, oo wixii ay soo arkeen ay hantidhowraha Guud u keenaa, halkaa wali dabar baa ka muuqda, markaa waxaan odhan lahaa qodobka waa in wax laga badalaa oo la yidhaahdaa U sugma Gudiddan ee aan la odhan u sugma Hantidhawraha Guud.

**Waxaan soo jeedinaya:-**

- Marka qodobaa aan soo sheegay lagu daro in Xeerkan la sii daayo, oo aynu ansixiyo.

10. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** marka hore Shirgudoonka, mudanyaasha iyo saxaafaduba waad salaaman tihiin, salaan ka dib, Mashruuc sharcigan wuxuu u baahan yahay in dib u habeyn lagu sameeyo oo lala akhriyo xeerkaan ansixinay ee xeerkii ku tagrifalka iyo ilaalinta hantida qaranka, labadan xeer waxay iska shabahaan haga ciwaanada, qodobada xeerkani dhigayo waxay kaabi lahayd Xeerkii ilaalinta hantida qaranka iyo la-dagaalanka musuqmaasuqa, marka in xeer loo sameeyo musuqmaamsuqa horeynu u sameynay, waxaynu iminka u baahanahay wixii maamul wanaaga, qodobada Gudaha ku jira markaa waxay iska badalayaan sidii hore.

    Markaa ugu horeysa waxaa fiican in la iswaafajiyo labadaa mashruuc sharaci, Qodoba xeerkan ku yaal waxay kaabis u noqon lahaayeen xeerkii hore, oo sidaas ayaa laa dhigi lahaa markaan xeerka gudihiisa akhrido wuxuu u bahanyahay kala horeyn wixii horeyn lahaa baa danbeeya, qaar danbeyn lahaana way horeeyaan, sidoo kale marka xigta xeerkani malaha mabaadii iyo ujeedoyinka ka danbeeya ee loo aasaasay, arrimahaas oo dhan malaha, dhinaca markaa ka eegto xeerkii hore meelo badan uu ku jirey ayaa si kale ugu jira sida Eray bixinta.

    Markaan Guda galo xeerka, Magaca xeerkan waxaan ka saari lahaa la dagaalanka musuqmaasuqa waxay ku jiraan oo ka hadlaya xeer hirgalay, waxaana ku deyn lahaa Xeerka asaaska komishanka Maamul wanaaga oo aynu ku soo koobeynaa,

    **Qodobka 2aad** ee Xeerku waa laba arrimood oo isasaaran Eray bixinta iyo Fasiraada xeerka, markaa waa in laba qodob laga dhigaa oo waxay ahayd in marka hore lala kala saar, Kalmada Eraybixinta ku jirta ee EEX xeerkii ilaalinta hantida qaranka iyo ladagaalanka musuqmaasuqu si buu u micneynayaa inkastoo aad moodo in xeerkaa hore laga soo qaatey, sidoo kale DEEF baa la mida oo sidoo kale u qeexay oo waa si sharci daro ah lagu helay oo marka halkan lagu xusayo waa inay danbi u eegtaya oo cidi gashay. Musuqmaasuqa waxa lagu qeexay waxaa loo refergareeyay xeerkaa law Lr 13, waxaanu xeerkaasi ku qeexnayn ayuu ku qeexayaa, markaa Faqradaa oo dhan waan ka saari lahaa, Maamul wanaaga sida u qeexay ee ay ahayd halkan laguma qeexin.

    Halkaa markaa waxaa ku xigi lahaa Qodobka qeexitaanka oo ah Qodobka **Qodobka 6aad** oo ka soo hormari lahaa Shuruudaha, **Qodobka 3aad F/5aad** eray ayaan ka saari lahaa oo ku qoran todoba/shansanadood baa qoran, markaa mid hala saaro midna loo daayo, F/6aad iyana waa sidaas oo kale waxaa qoran inaanu ku dhicin xukun

maxkamadeed oo ciqaaba 3 sanadood shantii sanadoo ee ugu danbeysay, markaa ama intay doonto ha ahaatee ma cada inay danbi tahay baa la cadeeyay, markaa iyana in dib loogu noqdo oo 3 iyo 5 sano miduun la qaato weeye, **F/7aad** iyadu waxaa laga soo dheegtay **F/1aad** oo ay isku nuxur markaa iyana waa in laga saaro ayaa fiican maadaama ay isku wuxuun ka hadlayaan.

**Qodobka 4aad F/2aad** waxay tilmaameysa in Komishanku u madaxbaan yahay shaqadiisa oo waxaa reeban talaabo kasta oo lagaga leexinayo xil gudashadiisa, markaa in meel uun loo referegareeo ayay ahayd sharciga loo ban dhigo.

**Qodobka 5aad** shaqada iyo waajibaadka komishanka Maamul wanaaga waa u jeedooyinkii xeerku qaadan lahaa baa waajibaad laga dhigay**, F11aad** iyada waan ka saari lahaa **F/10aad** ma cada oo ma dhameystirna waa in laga saaraa hadaanu dhameystirnayn oo aanay macna soo kordhinayso ma jirto, F/15aad tala bixinta uu madaxweynaha siinayaan waxaan la qabaa sidii mudanaashii hore tilmaameen waxaan qabaa inay Golayaasha sharci dejinta siiyaan, waayo waxaynu dooneynaa wax maamulka u toosiya xukuumadii, taas macnaheedu waxaa imanaya contradiction oo hadii la doonayao in Komishanku uu shaqaeeyo si dhexdhexaad waa inuu warbixinta uu gudbinayo u gudbiyo Golaha Wakilada madaama cida wax laga sheegaya ay tahay Xukuumada, oo ay tahay inay ku dhaqanto xukuumadu.

**F/ 11aad** waan ka saari laha sidaan hore u soo sheegay, **F/18aad** iyo **19aad** iyana meesha ma qabaneyso iyana waan ka saarayaa, Qodobka 6aad waa dhismihii Komishanka, isna ma habeysna oo qaabkii dhismaha in la sameeyo oo la habeeyo, **F/1aad** in 5 sano laga yareeyo oo 3 sano laga dhigo ayaan soo jeedinayaa oo ka bilaabantah maalinta la dhaariyo, **F/2aad** waxaan iyana soo jeedinayaa in 7 xubnood laga dhigo, **F/3aad** qaabkey u dhigan tahay ayaan waxaan ka dhigayaa, inuu Madaxweynuhu Magacaabo Golaha Wakiiladu ansixiyaa, marka la eryayona in Goluhu ogolaado, oo hadii sidaa laga dhigo waxbuu qaban karaa, markaa taas ayaa ku raacsanahay Mudanayaashii iga horeeyay, F/**5aad iyo 6aad** labadaa farqadood ina Qodobada Maamulka aya gali lahaayeen.

Agaasimahana waxaan soo jeedinayaa inuu Agaasime maamulo noqdo si aanay shaqadii isugu murgin, oo komishanka loo madax baneeyo inay magacawdaan Agaasimahooda, oo aanu madaxweynuhu magacaabin, **Qodobka 12aad** warbixin sanadeedka waxaa ku qoran sida ku qeexan Qodobka 5aad, dee Q5aad maaha u jeedooyin, xeerkuna malaha u jeedooyin oo in loo sameeya, sidoo kale warbixintu madaama ay warbixin sanadeed tahay waa inay jirtaa waxay xambaarsan tahay oo ka hadleyso qodobeysan tahayna,

waana xeerka ay ku taalo waxyaabaha ay ka duuleyso iyo waxyaabaha ay taabanayso inay u cadyihiin ayay tahay.

**Qodobka 12aad F/4aad** oo tilmaameysa xilka iyo waajibaadka Gudoomiyaha, waxaa ku qoran waxaa uu soo saari karaa wareegtooyin, markaa waa aad u balaadhan oo u baahan in iyadana dib loogu noqdo, **Qodobka 17aad** ee awoodaha Komishanka waa qodobka ugu saameynta badan leh, wuxuu Komishanka siiyay awood balaadhan oo ka balaadhan xataa komishanka laftiisa, una gudbaya awood hay'ado kale sida garsoorka, hadaba side la isu waafajinayaa awoodaha komishanka ee halkan ku cad iyo awoodaha hay'daha kale leeyihiin, oo in lakala saao ayaa fiican, waa inuu leeyahay meel uu awoodaa ka dheegan karo oo xeera, markaa khilaaf baa iman doona hadii sidan xeerka lagu ansixiyo, sidaa darteed waa in qodobkaa dib loogu noqdaa oo lala akhriyaa xeerarka kale ee yaala oo loo sameeyaa dariiq uu komishanku awood ku yeelan karo.

**Qodobka 18aad** isaguna waa la mid kaa hore oo waa baadhista iyo xaqiijinta, intuba waxay la xidhiidhaan xeerkii hore ee Musuqmaasuqa ee law Lr 38.

**Sidaa darteed waxaan anigu soo jeedin lahaa:-**

- In xeerkan dib loogu noqdo loona celiyo Gudiddii ku shaqada lahayd iyagoo la soo akhrinaya xeerarka ay khuseyso, ama loo saaro Gudi madaxbanaan oo soo hagaajiya lana kaashada aqoonyahano iyo sharciyaqaano aqoon u leh, lana soo akhriyaan xeerarka aan soo sheegnay, ka dibna soo saara xeer la xidhiidhi kara xeerakaa kale komishankaana lagu asaasi karo, waad mahadsantihiin.

11. **Baar Siciid Faarax:-** Gudoomiyaha, Golaha iyo Saxaafada, waad salaaman tahay, Xeerkan aad iyo aad buu muhiim u yahay, laakiin ma ku dhaqmeynaa, wadankaa musuqmaasuqa baa ina wada ragaadiyay, waynu u baahnayn inaynu wax yar ina soo gala ilaalashano way fiicnaan lahayd laakiin ilamaha inay dhacayso, anigu waxaan qabaa xeerkan in laga baaraan dego oo gudigan waa gudi loo baahan yahay, xaqiiqdiina si fiican baa looga soo shaqeeyay, laakiin waxyaabo ka dhimanbaa jira.

Anigu ***in tirade Xubnaha Gudidda 7 xubnood laga dhigo ayaan raacsanahay***, hadeynaan gudidda awood u sameyn waa dad iska shaqaaleyn, hadaanay awoodaa yeelana kama duwana qof la shaqaaleeyay oo xoogaa uun loo sameeyay, in madaxweynuhu soo magacaabo waa caadi, laakiin marka xilka laga qadayo maaha inay madaxweynahah loo daayo, laakiin marka xilka qaadista hadii la yidhaahdo madaxweynuhu ka qaado waa canaan ka yaaboo waxba ma qaban karayaan gudidda waa

markaa waa in laga dhigaa mid madaxbanaan, meelo badan baa awalba diciifnimo inaga jirtey oo tahay in la madaxbaneeyo sida Hanitdhowraha iyo maxkamadaha sare iyo Gudoomiyaha baanka yaanay kuwanina sida ku waa hore noqon ha ahaadaan gudi madaxbanaan oo shuruudahooda leh oo ha la adkeeyo, si musuqmaasuqu meesha uga baxo oo ay uga duwanaadan qof la shaqaaleeyay.

**Markaa waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Gudidda awood madax banaan oo shuruudo loo sameeyo, oo Xilka qaadistooda Golayaasha Sharci dejinta laga dhigo, oo ha la adkeeyo Xeerka iyo shaqada Gudidda.

12. **Axmed Ducaale Bulaale:-** Horta hay'ada marka la abuurayo waxay u baahan tahay in lagu saleeyo Mabaadii iyo Ujeedooyin ka danbeeya abuuritaankooda, marka la eego magaca Hay'adu waa la dagaalanka musuqmaasuqa iyo Maamul wanaga, dee hay'ado u abuuran baa jirey Musuqmaasuqa inay la dagaalamaan oo ka mid tahay hanta dhowrka Guud iyo inaga laftigeenu waxaynu leenahay Gudidda la dagalanka musuqa, intaas oo hay'adood haday musuqmaasuqa waxba ka tari waayeen oo la gartey in hay'ad kale loo abuuro, waa inay la isweydiiyo hay'adu waajib caynkee bay qaadanaysaa, anigu marka hore waaan qabaa in la abuuro hay'ad oo waa loo baahan yahay, laakin waa in qaab ka duwan qaabkii Auditku u shaqaynayeen qaab ka duwan u shaqeeyan, marka aynu ka hadleyno Maamulwanaag waxaan leeyahay Komishanka Awood badan ha la siiyo.

Komishanka awood kowaad ee la siinayo ha noqoto Hay'ad horta Maamulwanaaga oo aynu xeerka ku siino, oo hay'ad kasta iyo mida la abuurayaa ha ogaadaan inay Gudidaasi jirto oo shaqeynayso, waana inay hay'ad walba si cilmiya ha ogaato inay sidii saxda ahayd u shaqeynayso, qodobka labaad ha noqdo awood ku tagri falka sida loogu tagri falayo waayo qaby bay ka tahay musuqmaasuqa, oo marka ay dhacdo nin wasiir ama masuulka awoodii sidii la rabay ugu tagri falay mise si khaldan buu ugu tagri falay, laakiin marka musuqmaasuq la yidhaahdo waa fal dhacay buu ka daba tagaa oo xafiisbaa hanti laga lunsaday.

Markaa waxaan soo jeedinayaa Hay'ada awoodeeda aanu ku saleyno ka hortaga maamul xumada hay'ada u abuuran waa inuu noqdaa, xeerka aan u abuureynaa waa inuu noqdaa xeerka ka sareeya mabdi'iyan tan hantidhowrka, sidaa darteed anigu marka horeba Magaca waan ka badalilahaa oo waxaan odhan lahaa aynu ka dhigno Hay'ada Maamulwanaaga iyo La-dagaalanka ku tagri falka Awooda dawlada, oo aynu ciwaankaa siino, ka reebno Musuqmaasuqa waayo Xeerbaynu hore ugu abuurney Musuqmaasuqa, xeerkaana hantidhowraha u authorizegareynay oo xeerkaasi fal dhacay buu ku saleysanyahay.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerka aynu ku salayno ka hortaga ku tagrifalka awooda iyo Maamul wanaaga oo labadaa qodob aan ku saleyno, principleka loo asaasanayo mabaadiida caynkaas ah aynu ku saleyno Xeerkana mar iyo laba aynu dib u eegno, aqoonyahano khibrad u lehna aan la kaashano.

13. **Md. Maxamed Jaamac Cilmi (Dable):-** shirgudoonka iyo mudanayashuba way salaaman yihiin, Gudoomiye east Africa Community iminka ka hor bay qaateen nidaamkan, wuuna fashilmay, sababta uu u fashilmeyna waxay ahayd dawladu sidii ingiiska xoriyada uga qaadatay waxaa iska horyimi nidaamkii jirey iyo kan east Africa community qaadatay, waxaa la arkay in awoodeedu ka soo horjeedo tii haykalka dawlada oo ay noqotay mid lagu soo dhex tuuray, intaasi waa iga muqadimo.

Waxaan waa hore u dhacay oo fashilmay arrinkan markaan galo, horta dastuur baynu leenahay, dastuurkeena markii la ogolaaday ilaa maanta wuxuu u dhaxeeyay hay'ado iyo wasaarado dhime qaab oo dawladeed ayaa ku jira dastuurka, dhismahaa ku jiray dastuurka ee lagu dhaqmayay wuxuu ka yimi tashriiciga Xeer-dejinta, Garsoorka iyo fulinta oo maamulku ku socdo, Gudiddan iminka la sameeya 18 qodob oo dastuurka ku jira ayuu ku jiraa, wax walba cilmi bay u baahan tahay, waxay soo qorteen waa xadhiga, waa eexasho, iyagu makaa CIDbaa ma daba galbaa, meel alaale iyo meel ayay kaga jiraan sharciga kaga jiraan ma jiro.

Qodobada halka ku yaala ku yaal ee ay soo qorteen Xasaanada ugu yar, xasaanadana **Qodobka 7^aad iyo 9^aad** baasheegaya oo waxaa leh cidii la soo doorto oo kaliya, hadii nin waliba intuu suuqa ka yimaado yidhaahdo xasaanad ha la isiiyo waxay noqoneysaa dawladii afweyne oo kale, wax walba waa inuu sharciga iyo qawaaniinta Guud uu ku fadhiyaa, Wasaarada Maaliyada iyo Hantidhawrka waxa weeye cida ugu sareysa ee intay qalinkaa cas la soo baxdo xafiiskasta kali karaysa.

shaqadii baynu ka qaadnay oo kuwan siinay, inan karaani ka ah hay'ad ayaa la odhanayaa lama qaban karo, sidaan loo qaban karaynin hantidhowrkii baa la qaban karaa oo dastuurka ku jiree, xuquuqdan siyaadada ah iyo shaqadani halkay ka xumaatey ayaa ka wanaagsan in la yidhaahdo qofka xurmadii in la siiyo, hay'adan maanay ka wanaagsanayn in la yidhaahdo, hay'ada Maamul wanaaga iyo shaqaalaha waayo administrationku haduu kaa xumaado ingriisow maxaad kaga tagtey baa la yidhi east Africa, waxaan kaga tagay buu qawaaniintan u dhigay iyo hindi oo hindaa ilaaliya qawaaniinta, hadii ninkii qawaaniinta lahaa ka qaadeyno oo odhanayno tuugbaad tahay kii CID aha, hantidhowrk iyo maaliyada hadaynu ka qaadeyno dastuurka dee aynu furno oo cod ha u qaadno oo inaga Guurtidu aynu qodobo ugu darno.

Gudoomiya xuquuqda aynu sheegayno ee dawladu leedahay hantida, wax soo saarka, dhaqaalaha, ama baadhida ama laaluushka ama wacyigalinta iyo maskabka xaaraanta ah

waa wax dastuuriya oo waxaa leh hay'adihii dastuurka ahaa, arrinkaa meesha ku jiraa waxa weeye aqoon buu u baahan yahay waayo waxan la soo qaaday waa ciqaab iyo tuuganimo, iyana waxay hadalkoodii ku bilaabeen Maamul wanaag, dee maamul wanaagu kalmad dhan oo micnihii bixineysa, waa wax hufan iyo bayaansan labadaa shey bay ku tilmaameen, wax kale waa wax la xadayo iyo musuqmaasuq iyana waa wax dastuurku sheegayo oo cid siiyay, markaa ma waxaynu ogolaanaa inay cidii lahay ka qaadno oo iyaga siino, mise waxaynu soo jeedinaa fikrad ahin ina Gudi Adhoc Committee loo saaro oo masuuliyada la leeyahay ee dastuuriga ah iyo maasuuliyada Gudidani doonayso in la kala saaro.

**Markaa waxaan soo Jeedin lahaa:-**

- In Adhoc Committee loo saaro oo waajibaadkooda gooni loo dhigo iyo halkay hoos imanayaan, markaa wixii wax lagu hagaajinayaa waa wax fiican laakiin markey masuuliyadu isgasho hawlbaa imanaysa, hantidhowrahu intuu halkaa ka dhaqaaqo buu dekada berbera galayaa oo lama joojin karo, laakiin iyagu ma gali karaan, inaguna xasaanada ma siin karo, waliba waxaan soo jeedinayaa in la hoos geeyo oo la yidhaahdo, Hay'ada Shaqaalaha iyo Maamulwanaaga arrinkaana waan qabaa. Mid kale barnaamij may keeenine ha keneen, waad mahadsantihiin.

**14.Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nac Nac):-** shirgudoonka sharafta badan leh way salaaman yihiin, waxaad moodaa xeerkan inuu iska gabgabo yahay oo xildhibaano badan ka hadleen, siday sheegeena waxaa ku jira qodobo badan oo dastuurka ka horimanaya, Xeerkan qolada komishanku awoodo farabadan bay isa siiyeen, waxaana qodobadaa ka mida Qodobka ay yidhaahdeen Xasaanad hanala siiyo sida Wasiirada.

Markaa, anigu Mudane Dable iyo Axmed Ducaale waan ku raacay inaynu wax ka badalno awoodan faraha badan ee Komishanku isa siiyay, laakiin Musuqmaasuqa waxaa jira Hay'ado farabdan sida hantidhowrka oo u baahan inaynu xoojino oo daba galno, shaqadoodna loo daayo, Xeerkana ka jarno Musuqmaasuqa, xaga maamulwanaaga waxaa fiican inaynu shaqaalaha hagaajino oo xeerka shaqaalaha xoojino, laakiin inaynu maamulwanaaga hay'ad kale ku wareejino mayba ahayn.

**Markaa waxaan soo jeedinayaa:-**

- Inaynu ka jarno Musuqmaasuqa oo u deyno Maamul Wanaaga uun bal u deyno, waad mahadsan tihiin.

15. **Md. Axmed Maxamed Nuur:-** Mudanayaal iyo Gudoomiye waad salaamantihiin, horta anigu intaan ka hadli lahaa waxaa iiga horeeyay mudanyaashii hadlay, laakiin waxaan qabaa Xeerkan in la laalo oo dalkuba umabaahana gabi ahaanba, waayo wuxuu lidi ku yahay dastuurka wuxuuna madaxa isugalinayaa hay'adihii dawlada sida hantidhawrkii iyo hay'adii shaqaalah, wuxuu kaloo mid intaaba ka sii daran oo ah inuu dabagal ku sameynayaa Wasaaradihii, halkaa waxaa ku lumaya Kalsoonidi u dhaxaysay Madaxweynihii magacaabay iyo Masuuliyiintii hay'adaha, **Qodobka 5aad F/1aad** ee darsida nimaadka maamul iyo ka soo talo bixinta toosinta hay'adaha dawlaha, mudanayaal waa xilkii waajibaadkii hay'ada shaqaalaha, **F/2aad** taasina waa xilkii iyo waajibaadkii hay'adaha shaqaalaha.

**F/8aad** ee isla qodobkan iyana waa xilkii hantidhowrka oo isna waa sidaas oo kale oo waxay leeyihiin anagaa baadhista sameynaya.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Markaan darsey Xeerkan wuxuu dalka ka abuuraya khas ku yimaada nidaamka dawlada, wuxuuna xumeynayaa xidhiidhkii u dhaxeeyay Masuuliyiinta Qaranka iyo Madaxweynaha, Markaa Xeerkaa Dalkeenu uma baahna maanta markaa waa in la laalo.

16. **Md. C/raxman Yuusuf Cartan:-** aniga waa ila ceeb ina Golaha Wakiilada laga maqno ha lalaalyo xeerkii musuqmaasuqa iyadoo la ogyahay halka musuqmaasuqu caalamka oo dhan laga qaylinayo, hadaad ka warheysaan inaga markaynu makhaayadaha joogno hebal baa lacag cunay, markaa waa arrin cad oo waynu ognahay markaa arrintaa in xeer laga soo saaro weeyaan oo lama maarmaan, waxaa maqlayay waxaynu leenahay Gudi musuqmaasuq iyo Hantidhowr, hantidhowrka awoodiisu waa limit oo awoodeedu waxay ku kooban tahay Miisaaniyada Qaranka oo kaliya, wixii miisaaniayda qaranka dibada ka ah magalo, sidaan ognahay macaawinada ugu badan ee inoo timaadaa waxay ka timadaa hay'adaha caalamiga sida qaramada midoobey iyo shirkadaha halkaana waxaa ka dhaca musuqmaasuq aad u weyn, markaa hay'ada aynu ka hadlayanaa waxa weeye hay'adii arrimha noocaas ah baadhi lahayd weeye oo hantidhowrhaha ka baxsan awoodiisa.

Somaliya waa wadanka 180aad ee musuqmaasuqa weeyaan, markaa maadaama awoodii hantidhawruhu intaa ku kooban tahay lama yidhaahdo moos baan leeyahaye mooskii daadkii wuu soo jabsaday oo musuqmaasuq badan baa jiree moosaska aan badsano, dalkeena markii Kumiye imanayay powerka aad iyo aad buu uga hadlayay musuqmaasuqa, xeerka Musuqumaasuqa markii la sameynaya Kumiye muu iman ayaa la sameeyay, markaa maaha inay yidhaahdaan war noo daaya ha noo siijiree, markaa komshin la dagaalan musuq baynu u baahanay, caalamkoo dhan waa sidaa, oo way leeyihiin Hantidhowr iyo Gudi barlamaan oo la dagaalanta musuqmaasuqa.

Hadaynu Gudiddu inay wax qabato waa inaynu Xasaanad siino, hadaanay lahayn Xasaanad Laad baa lala dhacayaa, arrinta dastuurkeenuna wuxuu ogolyahay in wixii laga maarmaan noqda in la sameeeyo sida hay'adan, ninkii yidhaahda dastuurkuu ka soo horjeedaana been buu sheegay, hadaad tiraahdaan yaan la sameyn Gudidana waxaynu u kaanaynaa niman musuqmaasuqa taageersan oo doonaya.

**Waxaan soo jeedinayaa makraa:-**

- Xeerka in la Ansixiyo, waayo waayo ambarella ayay ka tahay Dawlada, waana cidii baadhi lahayd shirkadaha iyo hay'adaha Caalamiga ah iyo hadii shirkad tiraahdo shidaal baan baadhayaa cida baadheysaa waa iyaga.

17. **Md. Maxamed Jaamac Cabdi:-** Mudanayasha waxaan marka hore xeerka ina horyaal u qaybsamaa laba arrimood oo kala aasaaska komsihanka maamul wanaag iyo La-dagaalanka Musuqmaasuqa. Labadaa arrimood markaa u kala qaado, Aasaaska Komishanka Maamul wanaaga, markaynu halkaa hoojgo waxaa laga maarmaan ah in xilka hay'ada Komishanka noqdo in la dhiso shakhsiyadii lagu tababarilahaa dadka hawl wadeenada ah ee hay'adaha dawlada ee gacanta ku haya shaqadii, waxaa lagama maarmaan ah inay shaqadeedu noqoto tilmaan iyo tababar oo toosin noqoto oo ay abuurto weeye.

Qaybta kale ee Musuqmaasuqa wuxuu ka hor imanayaa:-

- Xeerka la-dagaalanka Musuqmaasuqa oo aynu hore u ansixinay, xeerkaasi wuxuu awood siinayaa Hantidhowrka iyo xeer ilaalinta oo midna baadhaya midna ku soo oogayay.
- Xeerka Ciqaabta Guud iyo Habkiisa oo tilmaamay sida dacwada loo ogayo, waxa xataa ku jira oo aan arkayay hadii xeer ilaaliyuhu diido waxaa oogaya garyaqaan madax banaan oo suuqa laga kaxaysanayaa nidaamkaana inagu ma lihin, mid habkeena la shaqayna karna maaha.
- Wuxuu kaloo ka hor imanayaa hantidhowraha guud awoodiisa, 12 qaab oo hantidhowrku ku shaqeeyo ayaa jira oo sida wax loo baadhayo ah.
- Inaga Waxaa jira Gudi la dagaalanka Musuqmaasuqa oo iyana ka hor imanayaa oo nidaam ay kuwada shaqaynayaan halkan kuma jiro.

Markaa mudanayaal hadaynu xeerkan sidaa ku ansixino waxay noqonaysaa inaga laftigeenu ka qabyqaadanayno inaynu korino oo kobcino musuqmaasuq, wuxuuna ku kordheyaa marka hay'adihii dawlada aynu iska horkeeno oo hawsha qabataba aynu u diidno, Waxaan leeyahay Xeerkan laguma dari karo la-dagaalanka musuqmaamusqa oo horey buu u jirey, lalamana soo eegin nuxurkuu ka hadlayaa xeerkasi xeerkan, markaa shaqada hay'adani noqotaa Maamul wanaaga oo kaliya, maamul wanaagana waa inaynu isla fahanaa oo daraasad ku sameynaa oo dadka yaqaana iyo sharciyaqaanada lagala

kaashadaa waxa loola jeedo Maamul Wanaaga iyo sida loo abuuri karo, waxaana loo abuuri karaa in hawlwadeena la tababaro oo dad aqoon leh la helo oo xaafiisyada yimaada, arrintaa kale ee musuqmaasuqa waxaan leeyahay waa iska leh cida sharcigu siiyay ee Xeerarka leh oo dastuurku tilmaamay.

**Sidaa darteed waxaan leeyahay:-**

- Waa inaynu joojino oo Xukuumada ku celino oo la soo waafajiyo Xeerarka kale ee uu ka hor imanayo, halkana kuma sixi karo oo daraasada uu u baahanyahay way balaadhan tahay. Waad mahad santihiin.

18. **Md. Ibraahim Axmed Raygal:-** Asalaama Caleykum waraxmatulaahi, salaanta ka dib, sidaa hore loo sheeg anigoo secondgareyna waxa weeya, xeerka la dagaalanka oo hore u jiray waa loo baahan yaha in lala akhriyayo, markaa wuxuu ka mid yahay arrimaha ama loopholeska xeerkani leeyahay, sidaa daraadeed halakala saaro oo xeerka qaybta odhanaysa la-dagaalanka musuqmaasuqa halaga saaro sida xildhibaanadu sheegeen oo horena way u jirtey.

Waa loo bahan yahay Maamul wanaaga, laakiin yaanay waa inaanay ku sameyn overlapping Hay'adihii hore u jirey iyo Xeerarkoodii, sida caadiga ahna, way jiraan hay'ado loo abuurey wax jira dalkuna wuu u baahn yahay, markaa waa inaanay wasaaradaha iyo hay'adaha kale aanay tabcaynin sidaa darteed anigu waxaan soo jeedinayaa qodobadan soo socda:-

- in xeerkan Gudiddii dib loogu celiyo oo laga soo saaro la-dagaalanka Musuqmaamsuqa ilayn waa xeer gaaree.
- Qodobada Dastuurka ah ee xeerku ka horimanayo in meesha laga soo saaro.
- Awoodaha aanay Gudiddu lahay iyadana laga soo saaro, waayo qodob badan oo power korodhsi u muuqda sida kaa dastuurka oo kale.
- Isla markaana lagu soo daro, Boardka ama Gudidda xukumeysa ay qab ka noqdaan oo lagu muujiyo xeerkan isaga ah Hay'ada shaqaalaha, Wasaarada Cadaalada, Wasaarada Diinta iyo Awqaafta iyo Hantidhawraha Guud, intaas oo dhan marka lagu muujiyo inay ka

qabyqaadan karaan waxaynu ka baaqsanaynaa inay isku murgaan Gudiyadaasi oo shaqadii waxay noqonaysaa mid wax tareysa.

Waxaan leeyahay waa loo baahan yahay Gudiddan, waxaana jira Good Governerska dhaqaale lagu caawiyo wadanka, dhinaca horumarka inay u muuqato shaqaalaha dawlada Good Governskay ka mid tahay inay tababar siiyaan oo weynu leenahay meel ay ku siiyaan oo waa Macadka Hay'ada shaqaalaha, human resource wanaag baana loo tababarayaa.

**Markaa Waxaan soo Jeedinayaa:-**

- Xeerkan aynu dib ugu celino Gudidda oo ka baaraan dagaan oo kala fadhiga danbe ha soo gudbiyaan iyadoo laga saaray sida Mudanayashii hore sheegeen

19. **Md. C/raxman Maxamed Jaamac (Xoog):-** waxaan qabaa in lagu degdegay oo aan laga fiirsan, komishankan waxaa la sameeyay iyadoon xeerkii lagu asaasayay la sameyn, miisaaniyadii horena way ku jirtay, anigu waxaan qabaa inaan Komishankaa maanta loo baahnayn, waayo wuxuu ka hor imanayaa xeerkii aan halka ka ansixinay ee la dagaalanka musuqa Law Lr 38, sidoo kale awoodii ayuu ka qaadayaa hanta dhowrihii guud ee qarana, markaa yaynaan gudidda caynkaas ah awood siin.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Komishanka shaqadiisa la hoos geeyo Hay'ada shaqaalaha dawlada laguna daayo maamul wanaaga, musuqmaasuqana halga reebo, oo waa in la laalaa Xeerkan iyo Awooda uu gudiddan siinayo.

| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
|---|---|
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ---------------------------------------------------------- | ---------------------------------------------- |